# Macluumaad loogu Talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha

*Somali*

Manhajka badbaadinta carruurta ee la yiraahdo 'The Keeping Safe' (KS:CPC) waa badbaadin carruureed ku saabsan xiriiryo waxbarasho oo ammaan ah ixtiraamna leh oo loogu talagalay carruurta iyo da'yarta da'doodu u dhexeyso dhallaan ilaa ay gaaraan sannad dugsiyeedka 12aad (da'da 17+). Barayaal dhammeeyey tababarkii loogu baahnaa ayaa ka dhiga dugsiyada iyo xarumaha waxbarashada hore.

KS:CPC waxaa sameeyey waaxda waxbarashada South Australia waana mid aad loogu qiimeeyo qoto-dheerida nuxurkeeda, dhumuceeda barashada iyo dabcigeeda casriga ah.

KS:CPC waxay ka caawisaa carruurta iyo da'yartaba in ay:

- Fahmaan xaq u lahaanshahooda in ay ammaan helaan
- gartaan dar xumeynta iyo xaaladaha ammaan darrida
- hal abuurtaan oo dhaqan qashadaan xeelado ay naftooda ku ammaan geliyaan
- raadsadaan kaalmo ayna soo sheegaan.

Waxbarashadu waxay kaalin weyn kaga jirtaa badbaadinta xuquuqda carruurta iyo da'yarta oo dhan, islamarkaana awood u siisaa in ay u doodaan ammaankooda iyo ammaanka dadka kaleba.

Waalidiinta iyo daryeelayaashaba waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay dugsiga ama xarunta waxbarashada hore ee carruurtooda kala hadlaan sidii ay u hirgelin lahaayeen KS:CPC.

Waxaad dulmar guud oo ku saabsan KS:CPC ka helaysaa bogga kan ku xiga.

Macluumaad dheeraad ah, ka txraac: www.kscpc.sa.edu.au/parent-carer-information.

## Baraha waalidiinta iyo daryeelayaashu ka helaan macluumaad

- Australian Centre to Counter Child Exploitation: www.accce.gov.au
- Child Helpline International (for schools outside of Australia): www.childhelplineinternational.org
- Consent can't wait (Australian Government): www.consent.gov.au
- eSafety Commissioner – information for parents: www.esafety.gov.au/parents
- Kids Helpline – information for parents: www.kidshelpline.com.au/parents
- National sexual assault, domestic and family violence counselling service: www.1800respect.org.au
- Parent easy guides (Parenting SA): www.parenting.sa.gov.au/easy-guides
- Raising children network: www.raisingchildren.net.au
- Youth Law Australia: www.yla.org.au

## Dulucyada KS:CPC

Labadan duluc waxay diiradda saarayaan mabaadi'da bu'da u ah manhajka iyo garowshahooda muhiimka ah:

- Geddigeen waxaan xaq u leennahay in aynu ammaan helno.
- Waxaan nafteenna ku caawin karnaa in aan la hadalno dadka aan aammin sannahay.

## Dulmarka KS:CPC

KS:CPC  waa badbaadin carruureed ku saabsan xiriiryo waxbarasho oo ammaan ah ixtiraamna leh (kana mid ah online ka) ee waddooyinka ku habboon da'da iyo korriimada carruurta iyo da'yarta da'doodu u dhaxeyso dhallaan ilaa ay gaaraan sannad dugsiyeedka 12aad (da'da 17+).

| | |
|---|---|
| Ammaan gelin | • Faham labada duluc ee KS:CPC.<br>• Aqoonso dadka la aamino iyo adeegyada taageerada laga raadsado. |
| Xuquuqda iyo mas'uuliyadaha | • Qof walba xuquuq buu leeyahay mas'uuliyadna way sarantahay.<br>• Asturnaan, kala fogaan iyo xudduudo.<br>• Sida fikradaha laga qabo jinsiga u waxyeelleyn karaan shaqsiyada iyo bulshada. |
| Ammaan iyo ammaan darro | • Astaamaha digniinta ee tilmaamayaasha xaaladaha ammaan darrida.<br>• Xeeladaha lagu wajaho xaaladaha ammaan darrida.<br>• Maareynta halista si xaaladaha looga dhigo kuwo ammaan ah. |
| Ku xirnaansho kalsooni leh | • Tayooyinka qofka lagu kalsoon yahay.<br>• Ku xirnaanta dad lagu kalsoon yahay iyo adeegyada wax caawiya.<br>• Sida lagu helo dad lagu kalsoon yahay iyo adeegyo wax caawiya. |
| Xiriiryo ixtiraam leh | • Astaamaha xiriiryada wacan, kuwa aan wacneyn iyo kuwa darxumada leh.<br>• Xuquuqda iyo mas'uuliyadaha xiriiryada.<br>• Oggolaanshaha iyo ku dhaqanka xeeladaha marxaladaha kala duwan. |
| Awoodda xiriiryada | • Isticmaalka suubban iyo darxumeynta awoodda.<br>• Dhaqan xumada xiriiryada, sida xoog sheegadka iyo colaadda qoyska.<br>• Xeeladaha ku aaddan dhaqan xumada. |
| Qeybaha jirka iyo taabashada | • Magacyada iyo Meesha ay ku yaallaan qeybaha jirka.<br>• Jirka oo dhan waa wax asturan.<br>• Ammaan, ammaan darro iyo taabasho aan la rabin. |
| Fahamka darxumeynta | • Wax u dhimid, darxumeyn (jireed, galmo, dareen) iyo dayac.<br>• Xeeladaha ku aaddan warbixinta xaaladaha darxumeynta iyo ammaan darrida.<br>• Dhaqan wanaagyada ammaanka ah marka aad caawineyso dadka kale. |
| Xeeladaha | • Adkeysi, si joogta ah iyo isla qummanaan.<br>• Xeeladaha badbaadinta si loo kordhiyo ammaanka. |
| Raadsiga caawimada | • Si joogto ah dib u eeg ku xirnaanshaha kalsoonida leh.<br>• Caawimaad laga raadsado dad lagu kalsoon yahay iyo adeegyada wax caawiya, sida xaaladaha deg degga ah. |